

Golaha Wakiilada JSL

Waaxda Hadal-qoraalka iyo Gudiyadda

Kal-fadhigii 29^{aad} Fadhigii 5^{aad}

Axad 05/12/2015

Fadhigu Wuxuu furmey 10:21 AM

Gudoomiyaha:- Baashe Maxamed Faarax

Quraan:- Xildibaan Xaamud

Ajendaha Fadhiga: - Warbixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka 2016ka.

Gudoomiyaha: - Mudanayaal sidaynu ku balansaneyn fadhigan manta waxaa in horyaal Miisaaniyada Qaranka ee 2016ka, Waxaa inala jooga Wasiirkii Maaliyada waxaynu dhageysaneyna Warbixinta Miisaaniyada ee Wasaarada Maaliyada, waxaan marka hore Xoghayaha ka codsanayaa in uu Golaha u akhriyo Warqada Madaxweynaha ee Soo gudbinta Miisaaniyada.

C/risaaq Siciid Ayaanle:- Bismilaahi raxmaani raxiim, ku shir-gudoonka Golaha Wakiilada, ujeedo soo gudbin Miisaaniyada 2016ka iyo Siyaasda Guud ee Miisaaniyadaas.

Mudanayaal Wuxaan idinku wargalinayaa in Fadhigii Golaha Wasiirada Lr. 187 ee qabsoomey 26/11/2015ka lagu ansixiyay Miisaaniyada iyo Siyaasda guud ee Miisaayada 2016ka, sidaas daraadeed, waxaan idiin soo gudbinayaa nuqulada Miisaaniyadaas iyo siyaasadeedii guud, hadaba mudanayaal waxaan idinka rajeynayaa inaad ka gudataan Waajibaadkiina Dastuuriga ah, Allaa Mahad leh, Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland.

Gudoomiyaha:- iminka waxaan ku soo dhoweynayaa Wasiirka Wasaarada Maaliyada Marwo Zamzam Cabdi Aadan si ay inoogu sharaxdo Miisaaniyada sanadka 2016ka, Wasiir ku soo dhowow.

Marwo Zamzam Cabdi Adam Wasiirka Wasaarada Maaliayda:- bismilaahi raxmaani raxiim, Shir-gudoonka iyo Xubnaha Golaha Wakiilada ASC, saaka oo ay tahey 5 December waxaan halkan idiinku soo gudbineynaa Miisaaniyadii Qaranka Sanadka 2016ka, waxaana idiin sameyn doonaa presentation laakiin anigu hordheeeda ayaan idin siin doonaa, Miisaaniyada 2016ka waxay ku qotontaa xaqiico dhab ah waxaanu sanadkan ka reebney oo sideeda bilood ee aan joogey waxyaabaha aanu eegeynay waxaa ka mid ahaa in inflation-ka meeluhuu ka soo galayay Miisaaniyada oo sanad walba la soo daabacayay 45,000,000/= (shan iyo afartan Milyan sl sh) oo ah \$7,000,000 (todoba Milyan

oo US Dollar ah) oo dabadeedna dakhli galeysay iyada sanadkan waanu ka reebney tii 2014kana waanu dhigney oo lama galin suuqa.

Miisaaniyadu Sanadkan waxay ku saleysan tahey Horumar (Development) oo ah in inta badan culeyska la saaro wixii horumar ah oo aad ka arki doontaan Miisaaniyada.

Miisaaniyada 2016ku waxay ka kooban tahey Miisaaniyada Dawlada Dhexe, Miisaaniyada Hay'addaha Madaxa Banaan ee Dawlada, Miisaaniyada Dawlada Hoose iyo Miisaaniyada Sanduuqa horumarinta Somaliland ee Wadama qaadhaan bixiyayaasha Somaliland (Somaliland Development Fund).

Waxaa Sanadkan culeyska la saarey Caafimaadka, Waxbarashada, Nababdalyada, Cadaalada oo iyadana Maxkaadaha la kordhiyay Garsoorayaasha 50% iyo biyaha oo sanadkii dhoweyd abaaro badan oo dhaceytay ay noqoteey biyo dhaamis wasaaradu gasho, waxaanu ku saleysaney in Miisaaniyada sanadkan in meelo badan ceelal laga qodo oo miisaaniyada ku jirta.

Sanadkan waxaa Miisaaniyada ku dheeraad ah saddex Hay'addood oo la sameeyay dhowaan kalana ah Dab-damiska, Hay'adda Miinada iyo Sakada, sidoo kale waxaa ku soo kordhey saddex hay'addood oo Civil Society-ga ah oo ay ka mid yihiin qolada naafada ee SNDF, qolada Wanaag farista oo Iyana budget aanu u sameynay iyo Dalada Saxaafada ee SOLJA, lixdaa hay'addood oo saddex dawlada yihiin, saddexna civil society-ga yihiin baa sanadka ku jirta Miisaaniyada.

Waxay sanadkan Miisaaniyada ay afar wiig dib ugu dhacdeey oo ka muuqata wada-shaqeyn ka dhaxeysa Golaha Wakiilada iyo Wasaarada, markaanu ka waada tashaney miisaaniyada sanadkan la sameynayo inay gaadho Gobolada oo ay Warbixina ka soo rururiyeen Gudidda Ilaalinta iyo Daba-galka Hantidu, waxaanu ku soo darney in wixii Gobolada gaadhi jirey 5% loo qoondeeyo in loogu daro sanadkan Gobolada, waxa kale oo Miisaaniyadu ku fadhidaa Gudidda Dhaqaalaha iyo Maaliyada oo iyagu soo marey meelkasta oo dakhli laga soo ururiyo warbixina ka keenay oo iyagana aanu kawada shaqeynay in dakhligu la soo saarayo intiisa badan meelaha qaar culeys la saaro oo aaney budgetka aynu sugeynaa aanu ku ekaan uun katamada oo ilaa bariga culeys la saaro oo Iyana mareysa 35%.

Waxay Miisaaniyadu sanadkan culeys lagu saarey in la qoro booliis 500 oo qof ah si nababdalyada taam u noqoto, sidoo kale Ciidanka Xeebaha 100 askari loo qorey, isugeyn sanadkan shaqaale 1,000 qof ku dhow-dhow ayaa soo galaya Miisaaniyada.

Waxay Miisaaniyadu sanadkan ku fadhidaa runtii xaqiqa dakhliga ina soo gala iyadoo dakhligu sanadkii hore ahay **\$180,000,00** sanadkan waxa weeye **\$203,000,000** waxaana ku gaadhney sanadka 2015 oo dheeraadka (surplus) aanu helnay ahay **\$15,000,000** dabadeedna **\$195,000,000** baan ku ka bilowney oo wuxuu noqdey **\$203,000.000** isugeyn waxay miisaaniyadu

noqoneysaa **\$300,000,000**, waxaana isleeyahay sidaanu ugu saleynay inay lacagtaasi soo baxayso.

Waxaa xaqiiqo dhab ah in cashuurta si wanaagsan loo bixiyo oo ay u baahan tahey uun in nidaamkeeda la hagaajiyo oo sanadkan waanu ka fuudh yeelnay.

Sanadkan cashuur lama kordhin, waxayna miisaaniyada sanadkani dabaqeysaa in la sameeyo cashuuraha bariga oo la xoojiyo iyo in lagu tala-galo 5 xeer ee idinla yaal ee ah Public Financial Management Reform-ka, PFM reform-ka isagana lacago badan oo aan halkan ku cayneyn oo lagu shaqeynayo ayaa ku jira oo **\$5 milyan** oo sanadkan aanu World Bank kala saxiixayney oo sanadka cusub la soo deynayo, waxa kale oo ku jira **\$7.2 milyan** oo Iyana ay Hay'adda ingriiska ah ee Dhifil la yidhaahdo ay bixineyso.

Miisaaniyadu intaasey ku fadhidaa, markaad eegtaan dhalinyarada waxaa Iyana culeyska saarney sanadkan in garoomo badan la sameeyo oo garoomadaa dhalintu u hesho meelo ay ciyaaraha ku sameyaan oo dakhli ugu jiro, waxa kale oo miisaaniyada ka muuqata Gobolada waxaa laga dhisayaa xarumo Wasaarado badani ay ka dhisanayaan.

waxaa Miisaaniyadu ku saleysan tahey in Gobolada jiritaanka dawladu ka muuqato oo aaney sidii iminka laga soo warmey aaney ka caban in aaney xafiis heysan ama aaney gaadiid heysan, iyadoo sanadkan aanu u qorsheynay qaabka ay wax u gaadhayaan Gobolada, midi waa toos wax loo siiyo oo WARAN loogu diro, qaabkii isuduuhu intuu yimaado uu xarunta dhexe wax qaadan jirey iyada waanu badaleynaa qaabkaa oo waxaanu ku tala-galeynaa in wixii loogu talogaley gaadhaan oo la socoto 5% loo kordhiyay, wasaarada aaney wax u kordhina ma jirto, waxaanu eegnay oo dooneynaa in meelaha umadu u baahan tahey wax laga kordhiyo oo wasaarad kasta afar jeer ugu yaraan baanu isla fadhiisaney, qoladiina Golaha wakiilada dhowr jeer baanu isla fadhiisaney hadey tahey Gudidda ilaalinta Hantida Qaranka iyo Gudidda Dhaqaalaha.

Runtii waxaan jeclahey inaanu idiin soo bandhigno presentation-ka anagoo aad uga baaraan degnay markaanu afarta wiiga dib u dhacdey waxay aheyd in la qorsheynayay waxyaabaha ku soo biirey dakhliga ha noqoto ama hantida aan gaadhin Gobolada dalka ha noqotee in meel walba laga sameeyay, iminkana presentation-kii ku soo dhowaada.

Ku: Shir Gudoonka iyo Xubnaha Golaha Wakiiladda JSL Hargeysa

Ujeedo: Gudbinta Odoraska Miisaaniyadda Sannadka 2016:-

Mudane Gudoomiye, Gudoomiye ku xigeenayaal iyo Mudaneyaalba

Maanta oo ay taariikhdu tahay 05-12-2015, waxaan si weyn ugu faraxsanahay in aan idin soo gudbiyo Miisaaniyadda Dawladda ee sanadka 2016 taas oo la soo gudbiyey waqtigii uu sheegayey sharciga maaliyadda qaranka ee No. 90/96,anigoo ku hadlaaya magaca Wasaaradda Maaliyadda oo gudanaysa waajibka Dastuurka Qaranka qodobkiisa **55^{aad}** farqadiisa **1.^{aad}**

Miisaaniyadda 2016 waxay ka kooban tahay Miisaaniyadda Dawladda Dhexe,Miisaaniyadda Hayadaha Madaxa banaan ee Dawladda , Miisaaniyadda Dawladaha Hoose iyo Miisaaniyadda Sanduuqa horumarinta Somaliland ee ay maalgeliyaan wadamada Deeqbixiyeyaashu(Somaliland Development fund) iyo Miisaaniyadda Mashruuca Maamul Daadejinta Dawladda Hoose (JPLG), tafaasisheeduna waa sidan:-

Dakhliga Miisaaniyadda 2016

No	Hay'ada	SLSH	Dollar
1	Dawladda Dhexe	1,218,000,000,000	203,000,000
2	Hay'adaha Madaxa-banaan	226,580,189,543	37,763,365
3	Dawladaha Hoose	189,609,406,597	31,601,568
4	Dakhliga Deeqaha Caalamiga ah	109,861,212,000	18,310,202
5	Dakhliga Mashruuca Maamul Daadejinta	27,630,234,000	4,605,039
Grand Total		1,771,681,042,140	295,280,174

Hordhac:-

Mudaneyaal hadaan warbixin idinka siiyo Miisaaniyadda Dawladda Dhexe ee sanadka 2016, waxay ka koobantahay dakhli iyo kharash isku dheelitiran waxaana labadoodaba ay ka muuqda korodh badan iyada oo aanay jirin cid inaga kabtay, waxaanay Miisaaniyaddani ka badan tahay Miisaaniyaddii 2015. **13 %.**

Hadaan faahfaahin idinka siiyo korodhkaas wuxuu yahay sidan:-

Korodhka Dakhliga Miisaaniyada 2016.

Mudaneyaal iyadoo aad looga warwarsanaa in gulufka colaadeed ee ka bilaabmay dalka Yemen ay saamayn weyn ku yeelan doonto dakhliga Miisaaniyadda 2015, hadana ilaahay mahadii taasi may dhicin, waxaanay sababtay in ganacsi cusub bilaabmo oo ganacsatadu ay u dhoofiyaaan dalkaas badeecado kala duwan, taas oo sababtay in dakhli badani inaga soo galo.

Korodhka odoroskani waxaa uu ka soo jeedadedaalka wasaaradda maaliyaddu iyo hayadaha kale ee gacanta siiya ay ku hayaan ururinta dakhliga, gaar ahaan kor u qaadista cashuuraha berriga kaas oo laga soo qaaday wakhtigii dawladii hore **8%** halka sanadkan la hiigsanayo inuu gaadho **35%** dakhliga guud ee dalka, meelaha diirada la saarayana waxay yihiin cashuuraha kala ah, Cashuurta gedista, cashuurta macaash macaashka daaraaha, Cashuurta tigidhada, shaqaalaha iyo cashuuraha kale.

Sidoo kale waxa jira in wasaaradda maaliyaddu ay awooda saari doonto ururinta cashuuraha liisamadda ganacsiga iyo dakhliga Isgaadhsiinta, taasoo iyana wax weyn ka badali doonta kor u qaadista dakhliga, waxana jira in wakhtigan aanu ku hayno olole joogto ah, kuwaas oo aanu rajeynayno in sanadka soo socda guul ka gaadhi doono, waxa kale oo jira Qorshe ku saabsan hagaajinta Nidaamka cashuur ururinta waaxaha cashuuraha Beriga iyo kastamada iyadoo sanadkan aanu ku guulaysanay inaanu samayno xafiiska Cashuur bixiyeyaasha waaweyn (**Large taxpayer Office**) barnaamijkan dib u habaynta dakhliga waxaa farsamo ahaan nagala shaqaynaysa shirkada **Adam Smith** iyadoo ay maalgelinayso **DFID UK** kaas oo si fiican uga socda Waaxaha dakhli soo saarka.

Meelaha kale ee dakhliga sanadka 2016 ka kordhayo waxaa ka mida korodhka Badeecadaha soo degeya iyo kuwa dhoofaya oo kordhaya sanadba sanadka ka dambeeya.

Waxaa iyaduna xusuus mudan in dib u habayn balaadhani ay ku socoto nidaamka

Maaliyadda qaranka, kaas oo hada shuruucdiisii Golaha Wakiiladda ay hortalo si ay u ansixiyaan, kuwaas oo ka kooban shan biil oo kala ah (**Customs Bill, Revenue Bill, PFM Accountability Bill, Audit Bill and Procurement Bill**), kuwaas oo ay hore golaha Wasiiraddu u ansixiyeen, arinkaas oo sababay in deeq bixiyeyaaashu ay ku soo dhiiradaan inay si toos ah u maalgashadaan Somaliland iyagoo deeqahooda u dhexmarinaya Miisaaniyadda Dawladda, isla markaana waxaanu aasaasnay xafiiska xidhiidhinta deeqahaas (**Fudiciary Office**) oo ka tirsan xafiiska Xisaabaadka Guud, waxaana hada Baanka aduunka aynu kala saxeexanay mashruuc ku kacaya **\$4 Million**, kaas oo isna qayb ka ah dib u habaynta nidaamka Maamulka Maaliyadda qaranka (PFM), sidaas darted Mudaneyaasha sharafta leh ee Golaha Wakiiladda waxaanu ka codsanaynaa inay ansixiyaan xeerarkaas hor yaala golaha kuwaas oo muhiim u ah dib u habaynta aynu ku samaynayno nidaamkeena Maaliyadda qaranka.

Intas waxaa dheer in sanadka 2016 aanu ku rajaweynahay inaanu hirgelino nidaamka casriga ah (**SLFMIS**) kaas oo isku xidhi doona dhamaan nidaamyada Maaliyadda qaranka, iyadoo madaxyada Miisaaniyadda 2016 ay yihiin qaar waafaqsan kuwa caalamiga ee loo yaqaano (**GFS Government Finance Statistics**) ee ay dejisay hayada lacagta aduunku **IMF**.

Mudaneyaal waxaa iyaduna in la xuso ay tahay in sanadkan aanay Miisaaniyaddeena ku jirin lacag la soo daabacayaa, iyadoo sanadihii u dambeeyey la soo dabacay lacago badan taas oo sababtay sixir barar baahsan oo saameyey dadka iyo dalkaba, sidoo kale waxaanu sanadkan Wasaaradd kasta ku wargelinay inay Miisaaniyaddahooda u daadejiyaan gobolada iyo degmooyinka dalka una qoondeeyaan qadar dhan **5%**, ka dib talo soo jeedintii Guddida dabagalka hantida qaranka iyo Guddida Dhaqaalaha ee Golaha Wakiiladda oo iyaguna talo iyo tilmaanba ku lahaa Miisaaniyaddan 2016, taas oo ku tusaysa xidhiidhka togan ee wadashaqayneed ee u dhaxeeya Wasaaradda Maaliyadda iyo Golaha Wakiiladda.

Hadaba Sidaynu wada ognahay dalkan Jamhuuriyadda Somaliland sidii uu Madaxbanaanidiisa u la soo noqday, ma jirto wax deeq Miisaaniyadeed ah oo adduun weynaha inaga soo gaadhay, waxaase halkaas aynu ku soo gaadhnay dan wadaagnimada dhaqaalaha ee aynu dhaqanka u leenahay.

Markaa waxaan aaminsanahay, iskaashigaas oo si midaysan loo sii xoojiyaana inay qayb laxaad leh ka qaadanayso kobcinta dakhligeneen, markaa waxaan codsanayaa in Gurmadka Dakhli ururinta iyo Wacyigelinta Cashuur Bixinta, Qaran ahaan loo wada guntado.

□ Heerka Khasnada Dawladda ee Jan-October 2015.

Haddii aan warbixin kooban ka bixino natijadii ka soo baxday Odoroskii Miisaaniyadda 2015, Dakhliga dhabta ah ee ina soo galay **Jan-October 2015** wuxuu noqday **990,335,783,425** oo u dhiganta **\$165,055,964** halaka kutalagalka dakhliga **Jan-October 2015** uu ahaa **900,000,000,000/=**, waxaana dheeraad kasoo baxay **90,335,783,424** oo u dhiganta **\$15,055,963.904** Sidoo kale waxa jira Dakhli dheeraada oo ah **60,369,869,966** kana soo wareegay sanadkii **2013** isla markaana ku jira dakhliga Miisaaniyadda **2015** kaas oo ku jira qasnada dawlada.

Madax xigayaasha Dakhliga Miisaaniyadda 2016

Dakhliga Miisaaniyadda 2016 wuxuu u kala baxaa sidan:-

Nooca Dakhliga	Dakhli	Percentage
Hadhaaga Khasnadda 2014	56,799,504,671	5.59
Dakhliga Cashuuraha	955,137,575,693	73.57
Dakhliga adeega	80,472,299,894	9.02
Dakhliga Ganaaxyadda	5,031,270,052	0.39
Dakhliga Hantida	90,559,349,690	9.02

Kabka Dawladaha Hoose	30,000,000,000	2.41
Total	1,218,000,000,000	100

Korodhka Kharashka Miisaaniyadda 2016:-

Miisaaniyaddan oo ah mid ka turjumaysa waxqabadka Dawladden ee ku wajahan sanadka 2016(**Comprehensive Budget**) ahna mid wax ku ool ah waxay xooga saartay qodobadan:-

- ⊕ Cadadka, Qalabka iyo Saanada ciidamada dalka ee kala duwan.
- ⊕ Kordhinta Guud ahaan Miisaaniyadda bahda garsoorka.
- ⊕ Kordhinta Miisaaniyadda Goleyaasha Xeerdejinta.
- ⊕ Dhiska iyo Dayactirka wadooyinka dalka.
- ⊕ Dayactirka qaar ka mida Biriiyyada dalka.
- ⊕ Dhismaha wards ka Hargeisa Hospital
- ⊕ Dhismaha MCH yada uu Madaxweynuhu dhagax dhigay.
- ⊕ Dhismaha garoonka cusub ee Shulaac Stadium Hargeisa.
- ⊕ Dhismaha Libraryga Berbera iyo Hargeysa
- ⊕ Dhismaha xafiisyada Wasaaradda Beeraha ee sheikh iyo Laascaanood.
- ⊕ Dhismayaasha xafiisyada Wasaaradda Maaliyadda ee gobolada.
- ⊕ Dhismaha xafiiska Garyaqanka Guud
- ⊕ Dhismaha xafiiska Xuquuqal Insaanka
- ⊕ Dhismaha Xafiisyada Wasaaradda Ganacsiga & Maalgashiga ee gobolada ⊕ Dhismaha xafiisyada Wasaaradda Hawlaha Guud ee gobolada ⊕ Dhismaha Xafiiska Wasaaradda Xidhiidhka Goleyaasha.
- ⊕ Dhismaha Goobaha Kalluunka
- ⊕ Dhismaha Terminalka Berbera.
- ⊕ Dhismaha jeelal ka Burco iyo Boorama.
- ⊕ Dhismaha Rugta Ganacsiga
- ⊕ Dhismaha Madaarka Burco iyo Boorama.
- ⊕ Dhismayaasha Wasaaradda Biyaha, warfaafinta, guddida qandaraasyada iyo Guiddida Maamul Wanaaga.
- ⊕ Dayactirka garoonka kubada kolayga ee Tima-cadde ⊕ Daryeelka iyo Dibudhisika iskuulada dalka ⊕ Iibsiga qalabka caafimaadka.
- ⊕ Iibinta Dawada Mishiinka Kelyaha sifeeyaa.
- ⊕ Iibsiga Mishiinka baadhista tayada cuntada iyo Daawada.
- ⊕ Iibsiga qalabka Iidaacada iyo TV ga.
- ⊕ Iibsiga rooga Garoomada Borama iyo Burco.
- ⊕ Iibsiga gaadiidka iyo qalabka xafiisyadda Wasaaraddaha iyo Ha'ayadaha.
- ⊕ Iibsiga cagaf ta Wasaaradda Deegaanka ⊕ Kaalmooyinka Agoomaha.
- ⊕ Kaalmada Naafada SNM.
- ⊕ Kaalmada Ururka Naafada Qaranka.
- ⊕ Kaalmada Ururka Saxaafada Somaliland (SOLJA)
- ⊕ Kaalmada Guiddida Xumaan reebista iyo Wanaag farista. ⊕ Kaalmooyinka Asxaabta Qaranka 50%

- ⊕ Qodista ceelal biyood cusub iyo dayactirkooda.
- ⊕ Mashruuca Xanaanada Xoolaha
- ⊕ Aasaaska Degmo Heritage and Rural Life
- ⊕ Aasaaska Miisaaniyadda Hayada Diiwaanka Zakada.
- ⊕ Aasaaska Miisaaniyadda Ciidanka Dabdemiska
- ⊕ Aasaaska Miisaaniyadda Hayada wax ka qabadka Miinada (SMAC)

Noocyada Kharashka Miisaaniyadda Dawladda Dhexe:-

Miisaaniyadda Dawladda dhexe ee sanadka 2016 waxaanu muhiimada koowaad siinay maamul wanaaga gaar ahaan Nabadjelyada, tayeynta iyo kor uqaadista bahda garsoorka kordhinay gunada garsooreyaasha **50%**, kordhinta Miisaaniyaddaha Goleyaasha xeer dejinta, waxaanay Miisaaniyadda ka noqonayaan **55%**.

Sidoo kale waxaanu muhiimada labaad siinay adeega bulshada gaar ahaan Waxbarashada oo **8%** ka noqonaysa Miisaaniyadda, Caafimaadka iyo Biyaha iyagoo Miisaaniyadda ka ah **16%**, waxaanan ku kalsoonahay inay qdobadaasi ay bulshada wax badan u tarayaan, waxaa kale oo sanadkan tixgelinta la siiyey kaabayaasha dhaqaalaha iyo Deegaanka gaar ahaan Wadooyinka haday tahay wadooyinka Caasimada iyo wadooyinka kale ee dalkaba.


Waxaa sanadadii u dambeeyey korayey ku talagalka Miisaaniyadda hayadaha dhaqaalaha taas oo Miisaaniyadda ka ah **25%**, iyadoo sanadkana aanu Miisaaniyadda ku darnay Madaxa xigaha Kaydka Qaranka kaas oo wax badan ka bedeli doona dhaqaalaha dalka. Waxaa xusida mudan in Miisaaniyada 2016 aanu muhiimad weyn siinay ilaalinta deegaanka iyadoo sanadka 2016 la qori doono **100** ilaaliye oo ah **Forestry Guards**.

Mudaneyaal waxaa Miisaaniyadda sanadkan ku cusub saddex hayadood, kuwaas oo kala ah Ciidanka Dab demiska, Hayada Diiwaanka Zakada iyo Hayada SMAC.

Wadaagaha Kharashka Miisaaniyadda 2016:-

No	Wadaagaha	Miisaaniyadda 2016	Percentage
1	Maamul wanaaga	670,209,578,717	55
2	Arrimaha Bulshada	197,107,034,520	16
3	Dhaqaalaha	301,288,918,565	25
5	Kaabaayaasha Dhaqaalaha iyo khayraadka Dabiiciga	49,394,468,198	4
	Total	1,218,000,000,000	100

Kaabaayaasha Dhaqaalaha iyo khayraadka Dabiiciga **Wadaagaha Miisaaniyadda 2016**




Dhinaca kale hadaynu ka eegno kharashka Miisaaniyadda 2016 oo u qaybsama kharashka hawsha iyo shaqaalaha (salary and operational cost) iyo kharashka horumarinta waxaa miisaaniyadda 2016 horumarin ahaan ugu jira **12.4 %**. Tafaasiisha qodabada kor ku xusanina waa sidan.

Kharashka Guud ee Miisaaniyadda Sannadka 2016.

M/Xige	FaahFaahin	Sannadka 2016	Percentage
210	Kharashka Shaqaalaha	583,570,912,260	47.9%
2210	Kharashka Iisticmaalka Adeega Hawsha	238,585,643,840	19.6%
2220	Kharashka Iisticmaalka Alaabta Hawsha	131,259,903,091	10.8%
2230	Daryeelka iyo Dib-u Dhiska Dhismayaasha	13,049,086,986	1.1%
2310	Iibsiga Hantida Raagta	38,227,083,720	3.1%
2320	Dhismayaasha Cusub	94,290,098,000	7.7%
2510	Kabka	5,326,760,504	0.4%
2630	Kalmooyinka Qaybahaa Kale ee Dawladda	27,991,390,800	2.3%
2650	Wareejimaha Lacagaha aan Deeqaha ahyn	61,734,942,000	5.1%
2660	Keydka Qaranka	8,264,858,800	0.7%

2910	Bixinta Deymaha Qaranka	15,699,320,000	1.3%
	Total	1,218,000,000,000	100%



Faahfaahinta Dakhliga Miisaaniyadda 2016

Dakhliga Miisaaniyadda 2016 wuxuu ka kooban yahay **1,771,681,042,140una** dhiganta doolar ahaan **\$ 295,280,174** tafaasisheeduna waxay tahay sidan hoos ku qoran:-

No	Magaca	Budget 2016	Dollar
1	Dawladda Dhexe	1,218,000,000,000	203,000,000.00
2	Dekedda Berbera	96,543,124,032	16,090,520.67
3	Baanka Dhexe	28,750,884,871	4,791,814.15
4	Wershada Korontada Berbera	11,823,077,220	1,970,512.87
6	Wakaaladda Biyaha Gebiley	1,680,000,000	280,000.00

5	Wershada Hargeysa	Korontada	8,790,000,000	1,465,000.00
7	Wakaaladda Biyaha Hargeysa		23,328,309,384	3,888,051.56
8	Wakaaladda Biyaha Burco		9,228,989,223	1,538,164.87
9	Madbacada Qaranka		4,480,422,713	746,737.12
10	Wasaaradda Duulista		2,808,000,000	468,000.00
11	Wakaaladda Biyaha Berbera		5,175,629,300	862,604.88
13	Haamaha Shiidaalka Berbera		26,879,976,000	4,479,996.00
14	Wakaaladda Biyaha Borama		7,091,776,800	1,181,962.80
15	Dawladaha Hoose		189,609,406,597	31,601,567.77
16	Dakhliga Deeqaha Caalamiga ah		109,861,212,000	18,310,202.00
17	Dakhliga Mashruuca Maamul Daadejinta		27,630,234,000	4,605,039.00
Grand Total			1,771,681,042,140	295,280,174

Wax ka Bedelka Tacriifada 2016

Sida caadadu tahay waxaa wax ka bedel iyo dub u eegis lagu sameeyaa tacriifooyinka Cashuuraha iyo Adeegyada Dawladdu qaado sanadkiiba hal mar.

Sidaas darteed; Sanadkan waxaa laysla qaatay in wax ka bedel lagu sameeya tacriifooyinka Cashuuraha waana sidan soo socota:-

Magaca Wasaaradda	Nooca Cashuurta/Fee ga	Tacriifadii Hore	Tacriifada Cusub
Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga	<u>Ruqsadaha</u>		
	Caws	100,000	150,000
	Xaabada	150,000	400,000
	Xaabo(garan-waa)	0	40,000
	Nuurada	300,000	300,000
	Berkeda La qodanayo	300,000	2,000,000
	Cashuuraha		

	Cawska (3 ilaa 6 ton)	70,000	120,000
	Cawska (7 ilaa 19 ton)	120,000	200,000
	Cawska (20 ton)	160,000	250,000
	Cawska Dameeraha iyo Fardaha	20,000	20,000
	Cawska Awrta	25,000	25,000
	Xaabada (6 ton)	30,000	100,000
	Nuurada (6 ton)	30,000	200,000
	Berkedaha	150,000	150,000
	Maydiga (100Kg)	50,000	150,000
	Moxorka, Fooxa (100Kg)	35,000	75,000
	Malmalka (100Kg)	15,000	35,000
	Xabag god (100Kg)	30,000	30,000
	Xabkaha Kale (100Kg)	5,000	10,000
	Malabka	1,000	1,000
	Ganaaxyada		
	Geela u dhaca Seeraha	15,000	20,000
	Lo'da	10,000	15,000
	Adhiga	3,000	3,000
	Dameeraha iyo Fardaha	10,000	10,000
	Dhuxusha (Kiishka)	2,500	3,500
	Mooyayaasha iyo Tibta (Halka Xabo)	0	10,000
	Ciida iyo Niista (3 ilaa 6 ton)	0	30,000
	Ciida iyo Niista (7 ilaa 10 ton)	0	60,000
	Dhagaxa Cas	0	100,000
	Dhagaxa Cad	0	30,000
	Dhagaxa Deberka	0	10,000
Wasaaradda Maaliyadda			
	Cashuurga Babuurga Yar yare e Raaxada ah Dhamaantood(Salon Car and station wagon)	90%	100%
	Cashuurga Spare parts	25%	35%
	Cashuurga Furnitures	30%	50%
	Cashuurga Cosmetics	50%	70%
	Cashuurga Perfumes	50%	70%
	Cashuurga Shampoo	50%	70%
	Cashuurga Saabuunta (Toilet Soap)	30%	40%

	Cashuurta Saabuunta (Laundry Soap)	20%	30%
	Cashuurta Saabuunta (Powder Soap)	20%	30%
WASAARADDA BOOSAHA IYO ISGAADHSIINTA	DIIWAANGELINTA		
	Diiwaangelinta Shirkadda Guud ee Cusub	\$ 200,000 markaliya	\$ 200,000 markaliya
	Diiwaangelinta Shirkadda ISP (Qaybiyaha Internetka)	\$ 2,000 markaliya	\$ 7,500 markaliya
	Diiwaangelinta Shirkadda Gateway	-----	\$ 200,000 markaliya
	Diiwaangelinta Internet (VSAT)	\$ 2,000 markaliya	\$ 2,000 markaliya
	Diiwaangelinta Internet Café	-----	\$ 100 markaliya
	Diiwaangelinta Boosaha Caalamiga ah	\$ 500 markaliya	\$ 1,000 markaliya
	Diiwaangelinta Boosaha Dalka	\$ 200 markaliya	\$ 500 markaliya
	CUSBOONEYSIINTA RUQSADDA		

	Cusbooneysiinta Shirkadda Guud 'Grade A'	\$ 20,000 sanadkii	\$ 30,000 sanadkii
	Cusbooneysiinta Shirkadda Guud 'Grade B'	\$ 15,000 sanadkii	\$ 15,000 sanadkii
	Cusbooneysiinta Liisanka Shirkad aan shaqayn	-----	\$ 5,000 sanadkii
	Cusbooneysiinta Shirkadda ISP Internet bixisa	-----	\$ 2,000 sanadkii
	Cusbooneysiinta Shirkadda Gateway	-----	\$ 50,000 sanadkii
	Cusbooneysiinta Internet café	-----	\$ 50 sanadkii
	Cusbooneysiinta Boosaha Caalamiga ah	\$ 500 sanadkii	\$ 500 sanadkii
	Cusbooneysiinta Boosaha Dalka	\$ 200 sanadkii	\$ 200 sanadkii
	CASHUURAH A IYO KHIDMADHA WAAJIBEY		
	Incoming Calls	0.01 daqiiqadii	0.02 daqiiqadii
	Outgoing Calls	0.01 daqiiqadii	0.02 daqiiqadii
	Mobile phones post/prepaid	0.0012 daqiiqadii	0.002 daqiiqadii
	KIROOYINKA		
	Hirarka HF/VHF	\$ 30 Hirkii/Bishii	\$ 50 Hirkii/Bishii
	Hirarka GSM 900	\$50 Hirkii/Bishii	\$ 70 Hirkii/Bishii
	Hirarka GSM 1700/1800/1900	\$30 Hirkii/Bishii	\$ 50 Hirkii/Bishii
	Hirarka Microwave	\$25 per Link/Bishii	\$35 per Link/Bishii
	Hirarka 21 GHz---10GHz	-----	\$ 30 Hirkii/Bishii
	Hirarka GSM 3G/4G	-----	\$100 Hirkii/Bishii
	Buuraha	\$ 50 Buurtii/Bishii	\$75 Buurtii/Bishii
WASAARADDA CADAALADDA			
	Ganaaxa Dilka Shilka ah	-----	2,000,000 SLSH/=
	Qodobadda Damaanadda leh A. Tashi B. Aan tashi ahayn	-	\$ 2,000 \$ 500

	Duris Garsoore	-----	100,000 SLSH/=	
	Cadeyn Dhaxal-koob	-----	100,000 SLSH/=	
WASAARADDA WARFAAFINTA IYO WACYIGELINTA QARANKA	RADIO HARGEYSA			
	Ogeysiis Derejadda 1 ^{aad} , Meheraddo yaryar	20,000 SLSH/= halkii minit	35,000 SLSH/= halkii minit	
	Ogeysiis Derejadda 2aad, Shirkadda/Company	20,000 SLSH/= halkii minit	50,000 SLSH/= halkii minit	
	Ogeysiis Derejadda 3aad, NGO/Hay'ad Samafal oo wadani ah	20,000 SLSH/= halkii minit	70,000 SLSH/= halkii minit	
	Ogeysiis Derejadda 4aad, NGO/Hay'ad Samafal oo caalami ah	20,000 SLSH/= halkii minit	120,000 SLSH/= halkii minit	
	Baafin Maxkamadeed	20,000 SLSH/= halkii minit	35,000 SLSH/= halkii minit	
	Xayiraad/xayiraad-ka-qaadi dhul ama dhisme	20,000 SLSH/= halkii minit	70,000 SLSH/= halkii minit	
	Naadin ama Baafin Xaraash	20,000 SLSH/= halkii minit	140,000 SLSH/= halkii minit	
	Iidheh Ganacsi yaryar	20,000 SLSH/= halkii minit	40,000 SLSH/= halkii minit	
	Iidheh Ganacsi Shirkad/Company	20,000 SLSH/= halkii minit	80,000 SLSH/= halkii minit	
	Tacsı Dadweyne	5,000 SLSH/= halkii minit	10,000 SLSH/= halkii minit	
	TV-ga QARANKA			
FAAH- FAAHIN	DURATION	UNIT PRICE	CIDDA WAX LOO XAYEYSIINAYO IYO HALKA LAGA SII DEYNAYO	MUDDADA UGU YAR
Xayeysiis	1 minute	\$ 10 per minute	Local Community & Local TV	7 days

QIIMAHА XAYEYIISKA STANDARD-ka 2^{AAD} EE SHIRKADAHA IYO LNGOyada				
FAAH-FAAHIN	DURATION	UNIT PRICE	CIDDA WAX LOO XAYEYIINAYO IYO HALKA LAGA SII DEYNAYO	MUDDADA UGU YAR
Xayeysiis	1 minute	\$ 20 per minute	Local Community & Local TV	7 days
QIIMAHА XAYEYIISKA STANDARD-ka 3^{AAD} EE HAY'ADAHA CAALAMIGA AH				
FAAH-FAAHIN	DURATION	UNIT PRICE	CIDDA WAX LOO XAYEYIINAYO IYO HALKA LAGA SII DEYNAYO	MUDDADA UGU YAR
Xayeysiis	1 minute	\$ 30 per minute	Local Community & Local TV	7 days
QIIMAHА XAYEYIISKA STANDARD-ka SATELITEKA IYO LOCALka OO ISKU JIRA				
FAAH-FAAHIN	DURATION	UNIT PRICE	CIDDA WAX LOO XAYEYIINAYO IYO HALKA LAGA SII DEYNAYO	MUDDADA UGU YAR
Xayeysiis	1 minute	\$ 20 per minute	Local Community & International TV	10 days
Xayeysiis	1 minute	\$ 40 per minute	Local NGOs & International NGOs	10 days
QIIMAHА BARNAAMIJKA STANDARD-ka LOCAL TV-				

ga EE BULSHADA SOMALILAND				
FAAH-FAAHIN	DURATION	UNIT PRICE	CIDDA WAX LOO XAYEYSIINAYO IYO HALKA LAGA SII DEYNAYO	MUDDADA UGU YAR
Barnaamij	1 minute	\$ 10 per minute	Local TV..... Madarasadaha	10 minute
QIIMAH BARNAAMIJKA STANDARD-ka LOCAL NGO EE BULSHADA SOMALILAND				
FAAH-FAAHIN	DURATION	UNIT PRICE	CIDDA WAX LOO XAYEYSIINAYO IYO HALKA LAGA SII DEYNAYO	MUDDADA UGU YAR
Barnaamij	1 minute	\$ 15 per minute	Local TV..... barnaamijka wacyigelinta, shirarka jaraa'id, seminarska ,	10 minute
QIIMAH BARNAAMIJKA HAY'ADAH CAALAMIGA AH (UN and INGOs)				
FAAH-FAAHIN	DURATION	UNIT PRICE	CIDDA WAX LOO XAYEYSIINAYO IYO HALKA LAGA SII DEYNAYO	MUDDADA UGU YAR
Barnaamij	1 minute	\$ 30 per minute	Local TV..... barnaamijka wacyigelinta, shirarka	10 minute

			jaraa'id, seminarska ,	
--	--	--	---------------------------	--

;

;

QIIMAH BARNAAMIJADA HAY'ADAH CAALAMIGA AH EE SATELITEKA IYO LOCALKA ISKUGU JIRA				
FAAH-FAAHIN	DURATION	UNIT PRICE	CIDDA WAX LOO XAYEYSINAYO IYO HALKA LAGA SII DEYNAYO	MUDDADA UGU YAR
Barnaamij	1 minute	\$ 40 per minute	Local TV and Satellite TV..... barnaamijka wacyigelinta, shirarka jaraa'id, seminarska ,	10 minute
FAAH-FAAHIN	DURATION	UNIT PRICE	CIDDA WAX LOO XAYEYSINAYO IYO HALKA LAGA SII DEYNAYO	
Warka	Halkii war	\$ 150 habeenkii	Local NGO-yada, seminarska, shirka jaraa'id, IWM	
Warka	Halkii war	\$ 250 habeenkii	UN iyo INGO-yada (Hayadaha Caalamiga ah), seminarska, shirka jaraa'id, IWM	
Xayeyiiska Liidka yar ee xage hoose ee TVga mara oo Local ah	\$ 5			
Xayeyiiska Liidka yar ee xage hoose ee TVga mara oo satellite ah	\$ 10			
QIIMO- DHIMIS/DISCOUNT 1 Month				

8% discount 3 Months – 6 Months 15% 6 Months – 1 Year 20%				
6	WASAARADDA GANACSIGA IYO MAALGASHIGA CAALAMIGA AH			
PROFESSIONAL SERVICE LICENSE	LOCAL		FOREING AND JOINT VENTURE	
BUSINESS AND INFORMATION	SOLE/PRICE	PARTNERSHIP/PRICE	SOLE/PRICE	PARTNERSHIP/PRICE
Consultancy	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Recruitment and Training Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Publishing and Printing Services	\$ 200	\$ 400	\$ 1,500	\$ 3,000
Research and Development	\$ 200	\$ 400	\$ 1,500	\$ 3,000
Translation Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,500	\$ 3,000
Investment Promotion Services	\$ 200	\$ 400	\$ 1,500	\$ 3,000
TRANSPORTATION SERVICES				
Regional Transport Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,500	\$ 3,000
Towing Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Taxi Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Motor Truck Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Car Wash Services	\$ 100	\$ 200	\$ 1,000	\$ 2,000
SAFETY AND SECURITY SERVICES				

Private Security Guard Services	\$ 500	\$ 1,000	Lama ogola	Lama ogola
------------------------------------	--------	----------	------------	------------

Security System Services \$ 200 \$ 400 \$ 1,500 \$ 3,000

REAL ESTATE AND HOUSING SERVICES				
Real Estate Agent Services	\$ 200	\$ 400	\$ 1,500	\$ 3,000
Warehouse and Storage Services	\$ 200	\$ 400	\$ 1,500	\$ 3,000
Tailor Services	\$ 100	\$ 200	\$ 1,000	\$ 2,000
Utilities Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Architect and Designing Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Installation, Maintenance and Repair Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Green house/Nurseries	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Mortgage	\$ 200	\$ 400	\$ 1,500	\$ 3,000
Fire Safety Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
PERSONAL SERVICES				
Janitorial/Cleaning Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Massage/Spa Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Photography Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Cinematography Services	\$ 200	\$ 400	\$ 2,000	\$ 4,000
Laundry Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Beauty/Salon Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000

Travel and Tourism Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Archeology Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
AGRICULTURE & FORESTY/WILD LIFE SERVICES				
Extermination/Pest Control Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Farming (Animal Production)	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Landscape Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Land Survey Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
FOOD/DRINK AND BEVERAGE SERVICES				
Bakery Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Catering Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Semi Classic Restaurant	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Semi Classic Hotel	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Guest House/Hotel Apartments	\$ 200	\$ 400	\$ 1,500	\$ 3,000
Meat Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Seafood Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
GAMING SERVICES				
Gym	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Entertainment Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Turf Sport Fields	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
FINANCIAL AND INSURANCE SERVICES				

Micro-finance Services	\$ 1,500	\$ 3,000	\$ 4,500	\$ 6,000
Insurance	\$ 2,000	\$ 4,000	\$ 8,000	\$ 10,000
MANAGEMENT SERVICES				
Business Management Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Business Statistics Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
LEGAL SERVICES				
Legal Firm	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
Advocacy Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
7	WASAARADDA HAWLAHA GUUD	Nooca Cashuurta	Tacriifadii hore	Tacriifadda Danbe
		Liisanka Dhismaha ee Foreman-ka	-----	1,000,000 SLSH/=
		Garage/Mechanical Garage		

Licenses

	Grade A	-----	1,500,000 SLSH/=
	Grade B	-----	1,000,000 SLSH/=
	Grade C	-----	500,000 SLSH/=
	Transportation Licenses		
	Grade A	-----	2,000,000 SLSH/=
	Grade B	-----	1,500,000 SLSH/=
	Grade C	-----	1,000,000 SLSH/=
	Carpentry and Aluminum Licenses		
	Grade A	-----	1,500,000 SLSH/=
	Grade B	-----	1,000,000 SLSH/=
	Grade C	-----	500,000 SLSH/=

	Liisanka Wadista Diiwaangelinta Bajaajta	-----	175,000 SLSH/=
	Liisanka Wadista Diiwaangelinta Mootada	-----	150,000 SLSH/=
	Cusbooneysiinta Liisanka Wadista Bajaajta	-----	70,000 SLSH/=
	Cusbooneysiinta Liisanka Wadista Mootada	-----	65,000 SLSH/=
	Liisanka korontada la wada leeyahay (partnership)	-----	\$ 1,500
	Liisanka Wakaaladda Korontada ee Hargeysa ee PPP	-----	\$ 2,000
Bilaydhada Gaadiidka			
	Afar Taayirle iyo wixii ka badan	255,000/=	285,000/=
	Saddex Taayirle Bajaaj	145,000/=	175,000/=
	Laba Taayirle (Motoo)	80,000/=	110,000/=
	Lambaradda Gaadiidka la dhoofinayo	100,000/=	130,000/=

Mudanayaal, iyadoo dunida ay ka jирто dhaqaale xumo iyo dhibaatooyin farabadan oo saameeyay dawladihii horumaray ee aduunka iyo kuwa dunida sadexaad oo hoos u dhacdhaqaale iyo sixir-barar badani saameeyay, dalkeenuna la qabo aduunka, hadana waxaa illaahay mahadiis ah in miisaaniyada dawlada dhexe ee sanadka **2016** ay ka badan tahay **13%** miisaaniyadii **2015**, sidoo kale hadii la bardhigo miisaaniyadii **2010** oo ahayd wakhti xilka dawladani la wareegtay waxay miisaaniyadani dheertahay **332%**

Hadaba anaga oo aan waxba kala hadhayn dedaalka lagu hirgalinaayo odoraska dakhliga miisaaniyada sanadka **2016**, waxaan ku kalsoonahay inaanu ka

midhodhalin doono idinkuna aad gacan buuxda naga siindoontaan wixii aan idiinka baahano insha Allaah.

Sidaa awgeed waxaan si sharaf leh idiinka codsanaynaa ansixinta miisaaniyada idin hor taala ee sanadka 2016, lifaaqa wax ka bedelka tacriifada iyo siyaasada miisaaniyada **2016** ee ku lifaaqan idinkoo waajibaadkiina Dastuuriga ah gudanaaya.

Cawad Cali Maxamed
Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI